


# *Aqoonkorodhsiga Naqshadda Dadweynaha ee Casriyeynta Cleveland ee Jadwalkiisa La Beddelay*
# *Imika waa Sabti, Feb. 3deeda marka ay saacaddu tahay 9:30g.h.*

Qoysaska Sharafta leh ee Cleveland High School & Cleveland Cluster,

Waad ku mahadsan tihiin la jaanqaadkiina iyada oo ay jirto in aanu ku qasbanaanay in aanu beddelno jadwalka aqoonkorodhsigan duufaanta jiilaal ee dhawaan awgeed. Mashruuca Casriyeynta CHS wuxuu marayaa marxlad muhiim ah hannaanka qorshaynta dhammaystiran waxaanan u baahanahay ra'yigaaga! Fadlan ku biir saaxiibadaa iyo jaarkaaga Aqoonkorodhsiga Naqshadda Dadwaynaha Cleveland ee soo socota ee Sabti, Feb. 3deeda 9:30gh ilaa 11:30gh oo ka qabsoomaysa Kafateeriyada. Hore u kaalay 9:00 g.h. si aad u hesho quraac fudud.
**Kaqaybqaadashaadu wakhtigan waa mid aad muhiim u ah.**

**Warka ugu Dambeeyey ee Mashruuca**
Qorshaynta Dhammaystiran ee Cleveland wuxuu bilaabmay dhammaadkii Sibtambar iyadoo la doortay 40+ qof oo ah Guddida Qorshaynta Dhammastiran (Comprehensive Planning Committee, CPC). Waxay ka kooban yihiin waalidiin, shaqaalaha dugsiga, ardayda, ardaydii hore iyo xubno bulsho. Waxay la yeesheen dhawr kulan kooxda naqshadda iyagoo ku kulmaya hannaan bulshadu leedahay oo ka shaqanaya soosaaridda qorshe heer sare ah oo loogu talogalay mustaqbalka Cleveland High School. Qorshuhu wuxuu wax ka qaban doonaa sida loo horumarinayo badbaadada ardayda ee gudaha iyo agagaarka dhismaha, siinta tilmaan ku aaddan halka dhismaha iyo qaybaha barnaamijka ku ooli doonaan iyo tan ugu daran ee ah, go'aaminta haddii ay tahay in dib loo dhiso dhismaha taariikhiga ahaa ama inta la dumiyo gabi ahaanba dib loo dhiso.

Aqoonkorodhsiga soo socda ee **Sabti**, ***Feb. 3deeda*** ee Naqshadda Dadwaynaha waa fursadda xigta ee xubnaha bulshada si ay u wadaagaan fekerkooda ku aaddan ikhtiyaarada naqshadda ee Cleveland High School la casriyeeyey. *Go'aano muhiim ah oo ku saabsan naqshadda mustaqbalka ee dugsiga ayaa la gaarayaa waxaana gaaraya PPS waana muhiim inaad ka qaybgasho si aad ula wadaagi karto fekerkaaga Kooxda Naqshadda.*

**Feker ka Dhiibo Ikhtiyaarada Naqshadda Cleveland**
CHS-ka la casriyeeyey wuxuu u baahan doonaa in lagu daro qiyaastii dhul dhan 50,000oo fuudh oo laba jibbaaran si uu u daboolo baahiyaha waxbarashada casriga ah. Si loo qaadsiiyo dhisme ka jira ka wayn meesha, dhawr ikhtiyaar ayaa laga fekerayaa:

- Bal in la iska daayo qaar ka mid ah dhismayaasha hadda jira ama in gabi ahaan dib-u-dhis lagu sameeyo
- Ku darridda dhisme cusub goobta baarkinka ee hadda jirta
- Ku darridda meelo ciyaaraha fudud loogu talogalay oo dheeraad ah meesha orodka ee hadda jirta

**Marka la codsado adeegyada tarjumaaddu waa diyaar**
PPS waxay rabtaa inay maqasho fekerka dad kala duwan oo badan oo ka tirsan bulshada Cleveland. Adeegyada tarjumaadda luuqadda waxa marka la codsanayo lala xiriiri karaa barta CHSBond@pps.net. **Fadlan soo jawaab ugu dambayn Salaasa, Janaayo 30keeda si markaa aanu kuugu qabanqaabin karno tarjumaan daboola baahiyahaaga.**

**Si joogto ah u booqo websaytka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah**
Websaytka casriyeynta Cleveland, www.pps.net/ClevelandBond waxaad ka helaysaa xogtii ugu dambaysay, waxa ku jira ajandihii kulamadii iyo hadal-jeedinihii hore si aad u daawato, waxaanad ka helayaa liis ah fursadaha ka qaybqaadashada ee soo socda.  Sidoo kale waxaad kaga biiri kartaa liiska dadka iimeylada loo diro ee mashruuca Casriyeynta Cleveland barta CHSBond@pps.net.

Waad ku mahadsan tahay inaad naga caawiso Cleveland High School casri ah oo la jaanqaadaya qarniga 21aad.